Sahminta Qaaxada iyo Cudurka Qaaxada ee ka Muuqan Dumarka Qaxootida Afrikaanka ah

Mashruuca Sii hagaajinta Caafimaadka Dumarka Qaxootida Afrikaanka ah

Xagaaga, 2005

Barnaamajka Caafimaadka Qaxootida iyo Soo-galootiga iyo
Qaybta Ka hortagga iyo Xakamaynta Qaaxada
Waaxda Caafimaadka Guud ee Massachusetts

Sahminta Qaaxada iyo Cudurka Qaaxada aan Muuqan: Dumarka Qaxootida Afrikaanka ah

Aqoonsiga Ka soo jawaabaha: __ __ __ __

Waxay ujeeddada waraysigaan tahay in lagu ogaado waxa soo socdo:

- Aragtiyada ay ka qabaan Qaaxada jaaliyadaha Dumarka Qaxootida Afrikaanka ah
- Falayaasha Dhaqanka ee raadka ku leh nolosha Dumarka Qaxootida Afrikaanka ah ee qabo Qaaxada
- Carqaladaha iyo waxyaabaha is-hortaagga ah ay la kulmayaan Dumarka Qaxootida Afrikaanka ah inay bilaabaan iyo inay dhammaystaan daawaynta Qaaxada iyo Cudurka Qaaxada aan Muuqan

Xasuusinta Waraysi-qaadaha: Waa in la buuxiyaa wararka guud ka hor inta aan la bilaabin waraysiga.

Wararka Guud:

Taariikhda Waraysiga: __/__/____
Waqtiga la Bilaabay Waraysiga: _____
Waqtiga la Dhammeeyay Waraysiga: _____
Xarfaha uu ka bilaabmo magaca Warasi-qaadaha: _____

Halka /Gobolka Waraysiga lagu qaadaayo (ku sameey hal koobaabin)

1. Gobol-waynaha Boston
2. Gobolka Waqooyi-bari/Dhexe
3. Gobolka Galbeed

Luqadda Waraysiga (ku sameey hal koobaabin)

1. Ingiriisiga (Habka)
2. Ingiriisiga Libeeriya
3. Soomaali
4. Af-Maay
5. Luqado kale (caddeey) _____

Nooca loogu Isticmaalay Su'aalowaydiinta (ku sameey hal koobaabin)

1. Habka Ingiriisiga
2. Ingiriisiga Libeeriya
3. In Su'aalowaydiinta lagu tarjumay Soomaali ama Af-Maay
4. In Su'aalowaydiinta lagu tarjumay luqad kale (Caddey) _____

Goobta Waraysiga (Koobaab dhammaan goobta ay khusaydo)

1. Guriga
2. Goob dadwayne
3. Goob kale (Caddey) _____

Tilmaanta la siinaayo Waraysi-qaadaha: Fadlan u akhri waxyaabaha soo socdo ka jawaabaha:

"Galab wanaagsan. Magacayga waa _____. Barnaamajka Caafimaadka ee Qaxootida iyo Soo-galootiga ee Waaxda Caafimaadka Guud ee Massachusetts ayaa I soo waydiisatay inaan kuu fududeeyo manta waraysigaan. Marka koowaad, waxaan doonayaa inaan kaaga mahad-celiyo waqtigaada iyo danayntaada waraysigan.

Wada hadalkeena aan kula yeelanayno waxuu ka caawinayaa Barnaamajka Caafimaadka Qaxootida iyo Soo-galootiga ee Waaxda caafimaadka ee Massachusetts sidii loo siin lahaa adeegyo aad u fiican Dumarka qaxootida Afrikaanka ah ee u baahan iyo kuwa hela daawaynta Qaaxada.

Waxaan danaynaynaa inaan idin maqalno iyo inaan idin ka barano. Si kastaba ha noqotee, haddii ay kugu fiicnayn waad iska diidi kartaa inaad ka jawaabtid su'aasha. Waxaa taa sii dheer, inaysan jirin jawaab sax ama qalad ah, haaddii aadan garanayna su'aasha fadlan waad u madax banaan tahay inaad I waydiisid inaan ku soo celiyo.

Waxaa la soo koobayaa faalooyinka, jawaabaha iyo warcelinta oo aad na siiday waxayna qayb ka noqonayaan warbixinta. Si kastaba ha noqotee, wax magacyo ah ma lagu soo daraayo warbixinta waxayna noqonayaan sir.

Haddii aadan doonayn inaad dhammaystirtid waraysigaan waxaad dooran kartaa inaad iska joojisid adiga oo ka welwelin. Falooyinkaada ama falalkaada goorta waraysigaan wax raad ah ama isbeddel ah ma ku yeelanayaan adeegyada lagu siiyo.

Ma qabtaa wax su'aal ah ka hor inta aan bilaabin?"

QAYBTA A: WARARKA MEELAHA DADKA KU DHASHEEN

Xasuusinta Waraysi-qaadaha: U akhri caddaynta soo socoto ka jawaabaha ee kuna koobaab jawaabaha uu bixinaayo ka jawaabaha daaqadda ku habboon:

Marka koowaad, waxaan ku waydiinayaa su'aalo guud ee ku saabsan asalkaada.

1. Dalkee ayaad ku dhalay?
    1. Soomaaliya
    2. Libeeriya
    3. Meel kale (sheeg) _____

2. Meeqo sano ayaad jirtaa? _____

Haddii macmiilka uusan aqoon ama diido inuu ka jawaabo, astaan ku sameey kala doorashooyinka soo socdaan:

1. Ma garanaayo
2. Wuu diiday inuu ka jawaabo

Xasuusinta Waraysi-qaadaha:
Fadlan u akhri caddaynta soo socoto ka soo jawaabaha ka hor inta la waydiin su'aasha #3. Markii aad waydiinaysid su'aasha, fadlan ha akhrin jawaabaha.

Waxaan doonaynaa inaan sugno in dhammaan dumarka qaxootida afrikaanka ah ay helaan xanaanada ugu fiican ee suurto galka ah, iyada oo loo fiirin jinsigooda ama asalkooda jinsiyadeed. Waxaan jecel nahay inaad inoo sheegtid jinsigaada ama asalkaada jinsiyadeed si aan dib ugu eegno adeegyada ay helaan dhammaan dumarka iyo si aan u sugno in qof kasto uu helo tayada xanaaneed ee ugu sarayso.

Xasuusinta Waraysi-qaadaha:
Su'aashaan waa la kala dooran karaa in laga jawaabo iyo inkale haddiise ka jawaabaha doonayn inuu ka jawaabo su'aasha #3 iyo/ama 4, fadlan waxaa tagtaa su'aasha #5.

3. Maxaad ka dhihi lahayd inuu yahay asalkaada jinsiyadeed?
    1. Madoow
    2. Caddaan
    3. Aasiyaan
    4. Isku-dhaf
    5. Wax kale (Sheeg) _____

4. Maxaad ka dhihi lahayd inuu yahay jinsigaada? _____

5. Ma xasuusataa sanadkii aad ka soo tagtay dalkaada hooyo?

1. Haa
2. Maya Haddi “maya” tahay, Tag su’aasha # 7

6. Sanadkee ayuu ahaa? _____

Xasuusinta Waraysi-qaadaha:
Su’aasha 7aad ha weydiin haddii ruuxa ka jawaabaysaa ay kuu sheegto sanadkii ay ka soo baxday dalkeedii hooyo.

7. Meeqo sano ayaa ka soo wareegatay markii aad ka soo tagtay dalkaada? _____

8. Ilaa markii aad ka soo tagtay dalkaada hooyo, miyaad **ku** nooleed xiro qaxooti?

1. Haa
2. Maya Haddii “maya” tahay, Tag su’aasha # 10

9. Ilaa meeqo sano ayaad **ku** nooleed xirada qaxootida? _____

10. Ilaa markii aad ka soo tagtay dalkaada, miyaad ku noolaatay **meel ka baxsan** xirada qaxootida?

1. Haa
2. Maya Haddii “maya” tahay, Tag su’aasha #12

11. Ilaa meqo sano ayaad ku nooleed meel ka baxsan xirada qaxootida? _____

12. Weligaa wax ma baratay?

1. Haa
2. Maya Haddii “maya” tahay, Tag su’aasha #18 ee Luqadda

13. Halkee ayaad ku baratay akhriska iyo qoridda? (Astaamee dhammaan kuwa ku khuseeyo)

1. Dugsiga Quraanka Tag su'aasha # 14
2. Baridda Guriga Tag su'aasha # 15
3. Dugsiga Caadiga ah Tag su'aasha # 16
4. Dugsiga xirada qaxootida Tag su'aasha # 16
5. waxbarashada E.S.L (Ingiriisiga oo loogu tabobaranaayo sida luqadda labaad)
6. Kuwa kale (sheeg) _____ Tag su'aasha # 17

14. Ilaa meeqo sano ayaad dhiganaysay dugsiga Quraanka? _____

15. Ilaa meeqo sano ayaa lagugu baraayay guriga? _____

16. Waa maxaay heerka ugu sareeyay dugsiga/waxbarashada oo aad dhammaysay?

1. Dugsiga Hoose Darajadee _____
2. Dugsiga Sare ee dadka yar-yar Darajadee _____
3. Qaar ka mid ah dugsiga dhexe/dugsiga sare Darajadee _____
4. Qalin-jibiyey Dugsiga Dhexe/Dugsiga Sare
5. Qaar ka mid ah machad/jaamicad
6. Qalin-jibiyey machad/jaamicad
7. Jaamacadda ka dib (master, darajada takhtarka, jaamacadda caafimaadka, dugsiga sharciga, iwm)
8. Kuwo kale (sheeg) _____
9. Ma xasuusto

17. Meeqo sano ayaad dhiganaysay dugsi "nooc kale ah"? _____

Xasuusinta Waraysi-qaadaha: U akhri caddaynta soo socoto ka soo jawaabaha koobaabna ku sameey jawaabaha soo jawaabaha qaanadaha ku habboon:

"*Haatan, waxaan ku waydiinayaa xoogaa su'aalo ah ee ku saabsan luqadda(adaha) aad ku hadashid iyo awoodda aad u lee-dahay ku akhrinta iyo ku qoridda luqaddaas."*

18. Waa maxaay luqadda **aad ku dhalatay**? _____

Luqadda **aad ku dhalatay** waxaan uga jeednaa luqaddaada koowaad Waxaa kaloo mararka qaar loo yaqaannaa "luqadda Hooyo".

Xasuusinta Waraysi-qaadaha: Luqadda ay ku dhalatay ku qor booska u diyaar ah weydiina su'aalaha soo socda.

Luqadda lagu dhashay Sheeg _____	Si aad u fiican	Si fiican	Si aan fiicnayn	Maya Haba yaraatee
19. Sidee fiican oo aad ugu **HADLI** kartaa _____?	1	2	3	4
20. Sidee fiican oo aad ugu **AKHRIN** kartaa _____?	1	2	3	4
21. Sidee fiican oo aad ugu **QORI** kartaa _____?	1	2	3	4

22. Luqaddee ayaad hadda ugu hadashaa **guriga**? Sheeg _____

Xasuusinta Waraysi-qaadaha:

1. Luqadda hadda guriga looga hadlo ku qor booska u diyaar ah
2. Haddii luqadda hadda looga hadlo guriga iyo luqadda lagu dhashay ee kore ay isu-mid yihiin markaas Tag su'aasha # 26
3. Haddii luqadda hadda looga hadlo guriga ay ka duwan tahay luqadda lagu dhashay ee kore markaas Tag su'aasha # 23

Luqadda looga hadlo guriga Sheeg ____	Si aad u Fiican	Si Fiican	Si aan Fiicnayn	Maya Haba yaraatee
23. Sidee fiican aad uga **HADLI** kartaa _____?	1	2	3	4
24. Sidee fiican aad ugu **AKHRIN** kartaa _____?	1	2	3	4
25. Sidee fiican aad ugu **QORI** kartaa _____?	1	2	3	4

26. Miyaad ku hadashaa Ingiriisiga?

1. Haa
2. Maya Haddii “maya” Tag su’aasha # 30

Luqadda Ingiriisiga	Si aad u Fiican	Si Fiican	Si aan Fiicnayn	Maya Haba yaraatee
27. Sidee fiican aad ugu **HADLI** kartaa Ingiriisiga?	1	2	3	4
28. Sidee fiican aad ugu **AKHRIN** kartaa Ingiriisiga?	1	2	3	4
29. Sidee fiican aad ugu **QORI** kartaa Ingiriisiga?	1	2	3	4

30. Ma ku hadashaa luqad kale?

1. Haa Haddii “haa”, (sheeg) Luqadda Koowaad _____ OO Tag S # 31
   (sheeg) Luqadda Labaad _____ OO Tag S # 34
   (sheeg) Luqadda Saddexaad _____ OO Tag S # 37

2. Maya Haddii “maya”, Tag **QAYBTA B**

Luqadda **Koowaad** (sheeg) _____	Si aad u fiican	Si fiican	Si aan fiicnayn	Maya Haba yaraatee
31. Sidee fiican aad ugu **HADLI** kartaa _____?	1	2	3	4
32. Sidee fiican aad ugu **AKHRIN** kartaa _____?	1	2	3	4
33. Sidee fiican aad ugu **QORI** kartaa _____?	1	2	3	4

Luqadda **Labaad** (sheeg) _____	Si aad u Fiican	Si Fiican	Si aan Fiicnayn	Maya Haba yaraatee
34. Sidee fiican aad ugu **HADLI** kartaa _____?	1	2	3	4
35. Sidee fiican aad ugu **AKHRIN** kartaa _____?	1	2	3	4
36. Sidee fiican aad ugu **QORI** kartaa _____?	1	2	3	4

Luqadda **Saddexaad** (sheeg) _____	Si aad u Fiican	Si Fiican	Si aan Fiicnayn	Maya Haba yaraatee
37. Sidee fiican aad ugu **HADLI** kartaa _____?	1	2	3	4
38. Sidee fiican aad ugu **AKHRIN** kartaa _____?	1	2	3	4
39. Sidee fiican aad ugu **QORI** kartaa _____?	1	2	3	4

QAYBTA B: ARAGTIDA/GARASHADA GUUD EE QAAXADA

Xasuusinta Waraysi-qaadaha:
Fadlan u akhri caddaynta soo socoto ka soo jawaabaha ka hor inta la waydiin su'aalaha soo socdaan. Markii aad waydiinaysid su'aalaha, fadlan ha akhrin jawaabaha. Astaan u yeel halka ugu dhow jawaabta soo jawaabaha.

*"Haatan, waxaan jeclahay inaan ku waydiiyo xoogaa su'aalo ah ee ku saabsan Qaaxada.***"**

40. Ma maqashay wax ku saabsan Qaaxada (TB'da)?
    1. Haa
    2. Maya
    3. Ma xasuusto Haddii "maya", ama "ma xasuusto" tag **su'aasha #57**

41. Markee maqashay waqtiga **koowaad** waxa ku saabsan Qaaxada?
    1. Ka hor imaanshaha US
    2. Ka dib imaanshaha US
    3. Ma xasuusto

42. Yaa kuu sheegay waxa ku saabsan Qaaxada waqtiga **koowaad**? (Koobaab hal meel)
    1. Saaxib, Qaraabo
    2. Hawlwadeenka caafimaadka
    3. Rugta Qaaxada
    4. Baraha Dibadeedka Jaaliyadda
    5. Wargayska
    6. Rediowga
    7. TV'ga
    8. Buugaagta yar-yar, warqado
    9. Xiradaa Qaxootida
    10. Meel kale (sheeg)_____

43. Waa maxaay astaamaha lagu garto Qaaxada? (Fiiri dhammaan waxa ku khuseeyo)

[Xasuusinta Waraysi-qaadaha: Waydii maxaa kale? Ilaa ay dhammayso jawaabaheeda]

1. Qunfac joogto ah oo ≥ 3 bilood
2. Xumad
3. Dhidid Habeenkii
4. Miisaanka uu dhumo
5. Qunfac dhiig leh
6. Waxyaabo kale, Fadlan sheeg_____
7. Ma garanayo

Xasuusinta Waraysi-qaadaha: Fadlan u akhri caddaynta soo socoto ka soo jawaabaha ka hor inta la waydiinin su'aalaha soo socdaan. Markii aad waydiinaysid su'aalaha fadlan ku sameey koobaabin qaanadaha ku habboon.

"*Waxaan kale oo aan danaynaynaa inaan kaa maqalno iyo inaan kaa barano waxa ku saabsan waxaad ka taqaan iyo waxa ay kula tahay Qaaxada."*

Su'aal	Haa	Maya	Ma garanaayo
44. Qof ma u soo gudbin karaa kuwo kale Qaaxada?	1	2	3
45. Ma laga hortegi karaa Qaaxada?	1	2	3
46. Miyeey daawada kaa celin kartaa inaad qaadid cudurka Qaaxada?	1	2	3
47. Miyeey daawayn karaan daawooyinka Qaaxada?	1	2	3
48. Miyuu cudurka Qaada yahay mid uu keenay jeermiga?	1	2	3
49. Miyeey Qaaxada ku fidi kartaa hawada?	1	2	3
50. Miyeey hooyada ku daaran kartaa Qaaxada cunugga inta ay lee-dahay uurka?	1	2	3
51. Miyeey qaniinyada xasharaadka ama kaneecada sabab u noqon kartaa Qaaxada?	1	2	3
52. Miyeey awoodo sar-sare sabab u noqon karaan Qaaxada?	1	2	3
53. Miyuu talaalka BCG ka celin karaa inuu qof qaado Qaaxada inta uu nool yahay?	1	2	3
54. Miyuu qofku ka bogsaday Qaaxada isla-marka astaaamahiisa/eeda laga waayo?	1	2	3
55. Miyaa in qofka loola dhaqmo si duwan sababta oo ah inuu/inay qaadanayaan daawooyinka Qaaxada?	1	2	3
56. Ma u malaynaysaa inay dadka ka baqayaan inay qaataan daawada Qaaxada?	1	2	3

QAYBTA C: ARAGTIYADA SHAKHSIGA/BULSHADA

Xasuusinta Waraysi-qaadaha:
Fadlan u akhri caddaynta soo socoto ka jawaabaha ee ku sameey koobaabin jawaabta ku habboon.

"Horay, waxaan kuu waydiiyay fikraddaada ku saabsa Qaaxada. *Haatan, waxaan jecelahay inaan ku waydiiyo xoogaa su'aalo ah ee ku saabsan aragtidaada (oo micnaheedu tahay waxaad u malaynaysid) waxa ku saabsan Qaaxada waxaana fadlan ii sheegtaa waxa ay yahiin jawaabahaada, waxaad uga jawaabi kartaa Haa, Maya ama Ma garanaayo. Ma jirto jawaab sax ama qalad ah."*

Su'aal	Haa	Maya	Ma Garanaayo
57. Miyeey saaxibadaada iyo qooyskaaga ka welwelaan inay qaadaan Qaaxo?	1	2	3
58. Miyuu welwelkaada Qaaxada la mid yahay welwelka aad ka qabtid guriyeenta?	1	2	3
59. Ma u soo booqan lahayd qof qaraabo ah ee qabo Qaaxada?	1	2	3
60. Ma u soo booqan lahayd saaxib ama jaar qabo Qaaxo?	1	2	3
61. Haddii qofka ka yimid (Soomaaliya/Libeeriya ama dalka uu ku dhashay) uu qabay Qaaxo, ma u malaynaysaa inay ama inuu u sheegayaan saaxib?	1	2	3
62. Miyeey dadka qabo Qaaxada ka welwelsan yahiin inay u gartaan kuwa kale inuu yahay qof qabo Qaaxo?	1	2	3
63. Haddii uu qof qabay Qaaxo, miyaad u malaynaysaa inay wax iska beddelayaan sida ay dadka kale u la dhaqmayaan qofkaas?	1	2	3
64. Miyaad u malaynaysaa in dadka aan ahayn takhaatiir caafimaad- sida daaweeyayaasha dhaqanka inay daawayn karaan Qaaxada?	1	2	3

Xasuusinta Waraysi-qaadaha:
Markii aad waydiinaysid seddaxda su'aaladood ee soo socdaan, fadlan ha akhrin jawaabaha. U sameey astaan dhammaan jawaabaha khuseeyo.

65. Haddii uu qofka joogi lahaa **xirada qaxootida** halkee baad kula talin lahayd isaga/iyada inay u tagaan daawaynta Qaaxada?

1. Daaweeyaha Dhaqanka
2. Takhtar ama Kal-kaaliye
3. Saaxib/Qooys
4. Wadaad
5. Kuwo kale (Sheeg) _____
6. Meelna _____
7. Ma garanaayo

66. Ka dib markii la gaaro US. ama **Gudaha U.S.** halkee baad kula talin lahayd inay dadka qabo Qaaxada ay tagaan sidii ay iskaga daaweeyaan Qaaxada?

1. Daaweeyaha Dhaqanka
2. Takhtar ama Kal-kaaliye
3. Saaxib/Qooys
4. Wadaad
5. Kuwo kale (Sheeg) _____
6. Meelna _____
7. Ma garanaayo

67. Maxaad u malaynaysaa waxa dhib uga dhigaayo inuu bukaanka Qaaxada qabo **helo** daawayn?

[Xasuusinta Waraysi-qaadaha: waydii ka jawaabaha " maxaa kale" ilaa ay dhammayso jawaabaheeda].

1. Gaadiidka
2. Dhibaatada jadwalka kiliinikada
3. Waqtiga sugitaanka oo aad u dheer
4. Hawlwadeenada kiliinikada oo aan lahayn saaxibtinimo
5. Shakiyo laga qabo xanaanada laga helaayo Kiliinikada qaaxada/ama

bixiyaha

6. Dhibaatooyinka Luqadda
7. Cabsi laga qabo kharashka daawaynta caafimaadka
8. Dhinaca waxyeelaynta daawada
9. Ma haysto qof iga sii haynaayo caruurta
10. Ku mashquulidda waxqabadyada kale ee nolosha
11 Waxyaabo kale, sheeg _____

68. Maxaad u malaynaysaa dhibka uu ku qabi karo bukaanka Qaaxada inuu **dhammaystirto** daawada?

[Xasuusinta Waraysi-qaadaha: waydii ka jawaabaha"maxaa kale" ilaa ay dhammayso jawaabaheeda].

1. Gaadiidka
2. Kilinikada Qaaxada oo aad u fog
3. Dhibaatada jadwalka kiliinikada
4. Waqtiga sugitaanka oo aad u dheer
5. Hawlwadeenada oo aan lahayn saxibtinimo
6. Shakiyo laga qabo xanaanada laga helaayo Kilinikada qaaxada/ ama bixiyaha
7. Dhibaatooyinka Luqadda
8. Cabsi laga qabo kharashka daawaynta caafimaadka
9. Dhinaca waxyeelaynta daawada
10. Ma xasuusan karo inaan si caadi ah u qaato
11. Aad ugu mashquulidda waxqabadyada kale ee nolosha
12. Waxay dadka ii sheegayaan inay daawada dhibaato lee-dahay ???
13. Waxyaabo kale, sheeg _____

Xasuusinta Waraysi-qaadaha: Fadlan u akhri caddaynta ka jawaabaha ka hor inta aadaan bixin waxyaabaha dhiirri-gelinta ah oo aadan soo gabagabayn waraysiga.

“*Waxaan sidaas ku soo gabagabaynaynaa waraysigeenii ka hor inta aanan dhammayn wada-hadalkeenii ku saabsanaa Qaaxada waxaannu rabnaa in aan kaaga mahad celinno waqtiga aad na siisay iyo ka qayb-galkaaga. Waraysigan waxuu naga caawin doonaa in aan hagaajinno adeegyada ay helaan dumarka kale ee ka yimaadda dalkaaga asalka ah Aad ayaanad ugu mahadsan tahay inta aad qayb ku yeelatay.*

Miyaad qabtaa wax su’aal ah oo aad u baahan tahay in aan kaaga jawaabo?”

Haddii uu ka jawaabuhu haa yiraa, ka jawaab su’aasha ka jawaabaha, sii macluumaadka xiriirka ee hawlwadeenada si looga caawiyo su’aalaha mustaqbalka, sii waxa dhiirri-gelinta ah oo soo gabagabee waraysiga.

Haddii ka jawaabaha yiraahdo maya, fadlan macluumaadka xiriirka ee hawlwadeenada si looga caawiyo su’aalaha mustaqbalka, sii waxa dhiirri-gelinta ah oo soo gabagabee waraysiga.